Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed
Kulliyadda Takhasuska & Cilmi Baarista

الجامعة الوطنية الصوماليه
كلية الدراسات العليا والبحث العلمي

Somali National University
Faculty of Graduate Studies and Research

## Program: Master of Da'wa & Imam

Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed & Wasaaradda Diinta & Awqaafta waxay iska kaashanayaan bixinta barnamij Master ah oo lagu qaadan doono Shahaadada Masterka **“Dacwada & Imaamnimada”.**

Kulliyadda Takhasusaadka & Cilmi baarista JUS, ayaa bixin doonto barnaamijkaas, mas`uulna

ka nqoon doonto habsami usocodka Barnaamijkaas.

Waxaa Casharada lagu qaadan doonaa Machadka weyn ee **“Masjidka Isbaheysiga Islaamka”.**

## Faahfaahin ku saabsan Barnaamjijka Master ka “Dacwada & Imaamnimada”

- **Magaca Barnaamijka:** Dacwada & Imaamnimada (**الدعوة والإمامة**)
- **Nooca Shahaadada la bixinaayo:** Master Degree (**ماجستير**)
- **Muddada Waxbarashada:** 2 Sano
- **Maalmaha Waxbarashada:** Sabti ilaa Khamiis
- **Qarashka Waxbarashada:** Lacag la`aan
- **Goobta Waxbarashada:** Machadka Masjidka Isbaheysiga Islaamka
- **Goobta Diiwaangelinta:** Xafiiska Diiwaanka Kulliyadda Takhasusaadka & Cilmi baarista JUS (Xamar Weyne)
- **Waqtiga Diiwaangelinta & Qabashada Codsiyada:**

  1/Nov/2023 ilaa 20/Nov/2023
- **Waqtiga ay Diraasada bilaabanayso:** 1/December/2023
- **Tirada Ardayda loo qaadanayo Dufcada 1aad:** 150 Arday

## Shuruudaha lagu qaadanayo Ardayda Cusub

Dhammaan Ardayda doonaysa inay ku soo biiraan barnaamijkan masterka ah

(برنامج **ماجستير الدعوة والإمامة**) sanad tacliimeedkan 2023/2024, waxaa laga rabaa

inay buuxiyaan shuruudaha hoos ku xusan:

1. Inuu Codsadaha barnaamijkan shahaadada heerka 1aad ka heysto mid ka mid ah takhasusyada hoos ku xusan

a. Shareeca wal qaanuun
b. Shareeca
c. Diraasaad Islaam
d. Fiqhi
e. Kitaab wal sunnah
f. Qur`aan
g. Carabi
h. Iyo Wixii la xiriira takhasusyadaas

2. Inuu ka soo gudbo Imtixaanka Qabuulka.

## Dukumintisyada laga rabo Ardayda Cusub

1. Codsade kasta waa inuu heystaa shahaadada heerka 1aad ee Jaamacadda asal & Copy

   (Shahaadada waa inay ahaataa mid tasdiiqsan)

2. Codsade kasta waa inuu Xafiiska kulliyadda Takhasusaadka & Cilmi baarista keensadaa
   - Warqad Codsi Waxbarasho
   - File ama Gal bir leh
   - Afar Sawir oo teesaro ah
   - Aqoonsi Shaqsi (Dhalasho & Sugnaan, ama Passport)
   - Warqadda Dambi la`aanta(CID)

3. Codsade Kasta Waa inuu la socdaa Waalid ama qof Mas`uul ka ah